Daryeelka Caafimaadka ee Ontaariyo: Helitaanka Warqadda Amarka Dawooyinka ee Dhakhtarka

Haddii aad xanuunsatid ama haddii uu dhaawac ku soo gaadho waxaad u baahan kartaa dawooyinka. Waxaa dhici karta in aad mararka qaarkood dawooyinka ka iibsan karaysid farmasiiga (dukaanka dawooyinka) adiga oo la-xidhiidhin dhakhtar ama kal-kaaliye caafimaad. Waxaa dawooyinka noocan oo kale ah waxaa la-yidhaahdaa "over-the-counter drugs" (dawooyinka la-qadaan karo iyada oo aan amar dhakhtareed la-haysan).

Dawooyinka kale waxay u baahan-yihiin in loo haysto amar uu dhakhtar bixiyey. Amarka dawooyinka ee uu dhakhtarku qorayo waxay xirfadlaha dawooyinka u sheegayaan nooca dawada/dawooyinka/ aad u baahan tahay, inta-jeer aad dawada/dawooyinka/ qaadabaysid iyo inta maalmood ee aad qaadanaysid. Xirfadalaha dawooyinku (pharmacist) wuxuu kuu sheegi doonaa sida ammaanka ah ee aad dawada u qaadan karaysid.

Maxaad ku-samayn amarka dawooyinka ee laguu qoray? Miyuu jiraa caymis-kasta oo kaa caawinaya lacagta aad dawada ku iibsanaysid? Xogta aad meeshan ka helaysid, waxay kaa caawin kartaa fahmidda arrimaha hoos ku-qoran:

- sida aad dawooyinka ugu heli karaysid warqadda amarka dawooyinka ee laguu qoray
- cidda bixinaysa lacagta dawooyinka ee gobolka Ontaariyo

Waxaad xaashidan xaqiiqada oo luuqado badan ku-qoran aad ka heli kartaa shabakadda internet-ka ee ciwaankeedu yahay: ontario.ca/healthcarebasics. Waxaad dhag ka siisaa (Click) furaha "Information in Other Languages". Naqshadda internet-ku waxaa kale oo ay ku siinaysaa khadad aad ka heli karaysid aqoon dheeraad ah oo ku-saabsan daryeelka caafimaadka ee gobolka Ontaariyo.

1. Dhakhtarkaygu wuxuu isiiyay warqadda amarka dawooyinka. Maxaan ku-sameeyaa warqaddan?

Waa in aad warqadda amarka dawooyinka lagugu siiyey aad u gudbisid farmasi (dukaan dawooyinka lagu iibiyo). Adiga oo ka-duulaya arrimaha ay ka mid yihiin goobta uu dukaanka dawooyinku ku yaallo iyo saacadaha uu shaqaynayo, waxaad dooran kartaa dukuaanka kuguu habboon.

Shaqaalahu waxay hubin doonaan amarka dawooyinka ee lagu qoray iyo xogta shakhsiyeed ee ay ka mid yihiin magacaaga, ciwaankaaga iyo lambarkaka taleefoonka. Haddii aad haysatid caymis kaa bixiya kharashka dawooyinka, waxaa lagaaga-baahan-yahay in xogtaasi sheegtid. Xirfadlaha dawooyinku wuxuu kuu sheegi doonaa habka ammaanka ah ee aad dawooyinka u qaadan karaysid. Haddii aad qabtid su'aalo kasta oo isticmaalka dawooyinkaaga ku-saabsan, waxaad hubisaa in aad dhammaan su'aalahaasi u soo jeedisay xirfadlaha dawooyinka.

Somali – Health Care in Ontario: Getting Prescription Drugs Cat# 015663 Nov/2010 © Queen's Printer for Ontario

Ontario

2. Dawladda Ontaariyo miyey bixin doontaa dawooyinka la ii qoro?

Waxaa dhici karta in aad u qalantid mid ka-mid ah barnaamijyada dawooyinka. Waxaa kuwan ka mid ah:

- Ontario Drug Benefit Program. Barnaamijkan wuxuu bixiya lacagta dawooyin ay noocyadoodu ka-badan-yihiin 3,300, oo ay ku-jiraan kuwa dhinaca nafaqada iyo kiimikooyinka baadhitaanka cudurka kaadi macaanka. Dhammaan dadka reer Ontaariyo ee ay da'doodu 65 jir ka-wayntahay barnaamijkan way u qalmaan.
- Trillium Drug Program. Barnaamijkani waa loogu tala-galay dadka ku nool gobolka Ontaariyo ee qaybta ugu badan ee dakhligooda u istimaala soo iibsashada dawooyinka uu dhakhtarku u qoro.

Ama, haddii aad shaqaale tahay, shaqaaleeyahaaga ayaa kuu diyaarin karaa barnaamij uu kaaga bixinayo qayb ka mid ah ama dhammaan lacagta dawooyinka. Haddii ay xaaladdu noqoto mid kuwan ka-duwan, adiga ayaa iska-bixinaya lacagta dawooyinka uu dhakhtarku kuu qorayo.

3. Sidan u codsan karaa Barnaamijka Faa'iidada Dawooyinka ee Ontaariyo ama Barnaamijka Dawooyinka ee Trillium?

Waxaa lagaa rabaa shuruudo aad barnaamijyadan aad xaq ugu yeelan karaysid.

Si aad ugu biirtid Barnaamijka Faa'iidooyinka Dawada ee Ontaariyo: Wuxuu barnaamijkani badanaa culayska saaraa dadka waayeelka ah iyo dadka guryaha u baahan ama kuwa daryeelka muddada dheer soconaya u baahan. Haddii aad tahay

- Qof 64 jir ka-weyn, iyo
- Qof haysta kaar caafimaadka ee Ontaariyo oo shaqaynaya

Waxaad u baahan-tahay in aad barnaamijyadaasi codsatid. Waxaad dukaanka dawooyinka la-tagaysaa warqadda dawada laguugu qoray iyo kaarkaaga caafimaadka. Xirfadlaha dawooyinka u sheeg in aad imika xaq u leedahay Barnaamijka Ka-faa'iidaysiga Dawooyinka ee Ontaariyo. Xirfadalha dawooyinku wuxuu hubin doonaa in aad xaqa u yeelan karaysid dhinaca Habka Shabakadda Caafimaad ee dawladda.

Waxaa jiri doona lacago aad adigu qayb ahaan bixin doontid. Waxaa dhici karta in aad codsatid hab aad ku-bixin qayb yar oo kugu soo hagaagaysa oo noqon doonta $2.

Xusuus: Waxaa kale oo aad barnaamijkan ku biiri kartaa adiga oo u soo-maraya barnaamij kale oo daryeel caafimaad oo ka –jira gobolka Ontaariyo, sida daryeelka muddada dheer soconaya ama daryeelka guriga dhexdiisa. Qofka kaa caawinaya codsashada barnaamijkaasi waxaa kale oo uu kaa caawin karaa Barnaamijka Ka-faa'iidaysiga Dawooyinka ee Ontaariyo.

Si aad ugu biirtid Barnaamijka Dawooyinka ee Trillium: Waxaa foomka codsiga ka-qaadan kartaa dukaanka dawooyinka ee goobtaada ka-jira. Ama, waxaad wacdaa taleefoonka 1-800-575-5386. Waxaa kale oo aad foomka codsiga ka heli kartaa shabkadda internet-ka.

4. Waxaan qabaa su'aalo ku-saabsan isticmaalka habka daryeelka caafimaadka ee Ontaariyo.Yaan wici karaa?

Waxaad la-xidhiidhaa ServiceOntario, INFOline inta-u-dhaxaysa 8:30 aroornimo illaa 5:00 galabnimo. Waxaad heli doontaa shaqaale kugu caawiya luuqadda Ingiriisiga, Faransiiska ama 20 luuqadood oo kale.Soo-wac:

- 1-866-532-3161
- TTY 1-800-387-5559
- Gudaha Toronto, TTY 416-327-4282

Waxaad xog dheeraad ah ka heli kartaa health.gov.on.ca